# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

**JAMHUURIYADDA DIMUQRAADIGA SOOMALIYA**

لجمهورية الصومال الديمقراطية

**Sannadka 5aad** | Muqdisho, 15 Maajo 1977 1.R.5

**Laanta Faafinta Rasmiga ah ee ka tirsan Madaxtooyada J.D.S.**

**FAAFIN BIL SOO BAX.** جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

# KOOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

SHARCI L. 35 ee 25 Jannaayo 1977, *Caddeyn Xiriirka dhexyaalla Xisbiga iyo Dawladda.* Bogga 436

SHARCI L. 36 ee 6 Abriile 1977, *Dhismaha Mashruuca Horumarinta Xeebaha .* » 438

## BOGGA LABAAD

## XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S ee 22 Nofember 76. *Habkii iyo Qaabkii Waaxidiinta Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta. L. 36* » 444

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 22 Febraayo 77, Magacaabid Guddiga Garsoorka Maxkamadda Badbaa*dada Dalka ee Gobolka Togdheer L. 37* » 446

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 9 Abriile 77, Isku *beddel Guddoomiyayaasha Maxkamadaha Badbaadada Dalka ee Gobollada L. 38* » 447

WAKAALADDA MADBACADDA QARANKA — MUQDISHO

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD ee 11 Jannaayo 1969
*Concessione e conseguente libera disponibilita' delle seguente aree demaniali; Aree di mq. 7505 a favore* dei Sigg. ri Scec Mohamed Mohamud e Iusuf Hasan *Roble, Aree di mq. 1. 365 a favore del sig. On le Ali Garad Jama. No. 39* » 448

*BOGGA SADDEEXAAD*

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXI LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 11.4.1977, Naada Dhul Jaalle Ayaan Maxamuud Shekh Faarax L. 202 » 450

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 11.4.1977, Naada *Dhul Jaalle Axmed Cabdi Axmed L. 203* » 451

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 11.4.1977, Naada *Dhul Jaalle Saciid Ismaaciil Cali L. 204* » 452

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 11.4.1977, Naada *Dhul Jaalle Qeyre Cilmi Rooble iyo Cabdullaahi Axmed Xirsi L. 205* » 453

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 11.4.1977, Naada *Dhul Jaalle Cabdullaahi Warsame Jaamac L. 206* » 454

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 11.4.1977, Naada *Dhul Jaalle Sareedo Cali Faarax L. 207* » 455

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 11.4.1977, Naada *Dhul Maxamed Ciise Cabdi L. 208* » 456

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 11.4.1977, Naada *Jaalle Maxamed Ismaaciil Warsame L. 209* » 457

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 11.4.1977, Beddelaad *Naada Dhul Jaalle Xaawa Muuse Cali L. 210* » 458

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 11.4.1977, Beddelaad Naada Dhul Jaalle Khadiija Afrax Abuukar L. 211 » 459

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 11.4.1977, Beddelaad *Naada Dhul Jaalle Cawrala Cegaal Dirir, L. 212* » 460

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 11.4.1977, Beddelaad Naada Dhul Jaalle Adar Cali Maxamed L. 213 » 461

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 11.4.1977, Beddelaad *Naada Dhul Jaalle Khadiija Xersi Cali L. 214* » 462



MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 23.1.1977 lumid Buugga L. 6658 ku qoran Sh. S0. 929,30 ay *leedahay Xaliima Cabdi Caruush L. 215* » 463

SOCIETA' COMMERCILAE ITALO SOMALA — S.C.S. *sp.A. Ogeysiis Isu yeerid shir caadi ah. L.216* » 464

*SOCIETA' COMMERCIALE ITALO SOMALA S.C.S. sp. Avviso di Convocazione di Assemblea Ordinaria L. 216* » 465

SOCIETA' ARRICOLA ITALO SOMALA S.A.I.S-S.p.A; Ogeysiis Isu yeerid shir caadi ah L. 217 » 466

SOCIETA AGRICOLA ITALO SOMALA S.A.I.S.S.p.A. *Avviso di convocazione di Assemblea Ordinaria L. 217* » 467

SOCIETA' ROMANA IN SOMALIA S.P.A: Ogeysiis Isu yeerid shir caadi ah L. 218 » 468

SOCIETA' ROMANA SOMALA S.P.A. Avviso di convoca*zione di Assemblea Ordinaria L. 218* » 469

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 4.5.1977, lu*mid Buugga keydka L. 975 ku qoran Sh. S0. 7.00000 uu leeyahay Axmed Maxamuud Wardheere L. 219* » 470

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 11.5.77 Lu*mid Buugga keydka lam. 945/4 uu leeyahay Suufi Jeylaani Maxamed L. 219/Bis* » 471

# BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

SHARCI L. 35 ee 25 Jen. 1977, caddeynta xiriirka dhexyaalla Xisbiga iyo Dawladdaba.

MADAXWEYNAHA

J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, tan labaad iyo tan Saddexaad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada kala ah 17, 18 iyo 19 ee soo baxeen 10 Luulyo 1976 kuna saabsanaa ku wareejinta Xilka Maamulka Guud ee Dalka Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lamb. yahay 1 ee soo baxay 10 Luulyo 1976;

IYADOO LA AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in sharci ahaan loo caddeeyo habka wada shaqeynta Xisbiga iyo Maamulka Dawladda, iyadoo laga tarjumaayo Xeerka iyo Barnaamijka Xisbiga;

ISAGOO ARKAY: Go'aankii Kalfadhigii Saddexaad ee X.H.K.S. oo ku saabsanaa Xiriirka Xisbiga iyo Dawladda.

WUXUU SOO SAARAYAA:

SHARCIGA SOO SOCDA

Qod. 1aad

Xilka Xisbiga:

1. Xisbigu wuxuu dejiyaa Siyaasadda Guud Dalka
2. Wuxuu ka taliyaa Guddoonshaana Qorshaha Dhaqaalaha, Siyaasadda, Bulshada iyo Difaaca
3. Wuxuu ku sameeyaa Kormeer, toosin iyo tusaalooyin hirgelinta Qorshahaas
4. Xisbiga waxaa hawlahaas u fuliya muddada u dhaxeysa labada kalfadhi ee Shirkeyne Hay'adaha soo socda:

Golaha Dhex, Guddiga Siyaasaga Hoggaammada iyo Guddigga kormeerka, Guddiyada Gobollada, Degmooyinka iyo Unugyada, Guddiga Dhexe ee Baarista;

5. Dawladda iyo Maamulka waxay u hoggaansamaan farriimaha iyo tusaalooyinka uu baxsho:
6. Golaha Dhexe ee Xisbigu wuxuu toos ahaan u magacaabi karaa ama ciddii uu wakiisho — Saraakiisha Sare ee Maamulka Dawladda sida Wasiirka — Agaasime Guud — Maareeye Guud iyo Danjire iyo wixii la hal maala;



Qod; 2aad

Xilka Dawladda

Dawladdu waxay diyaarisaa, maamushaa, fulisaana miisaaniyadda iyo Qorshaha Dalka ee Dhaqaalaha Siyaasadeed ee Xisbiga dejiyay iyo barnaamijkiisa.

Si gaar ah waxaa Dawladda xil ka saaran yahay:

1. Hirgelinta Mashaariicda Dhaqaalaha.
2. Baahinta Tacliinta dadweynaha, daryeelka Caafimaadka iyo Xoolaha.
3. Sahminta iyo ballaarinta ilaha Dhaqaalaha.
4. Degganaanta iyo xasiloonida Guud ee Dalka.
5. Socodsiinta hawlaha Maamulka.
6. Xoojinta Xiriirka Iskaashi (heer Dawladeed) ee ka dhaxeeya Dalkeena iyo Dalalka kale.
7. Abuuridda Shaqada iyo meelaha laga shaqeyn lahaa ama dadweynahu ka heli lahaa shaqo.
8. Waxay ku shaqeysaa Dawladdu Xannaanada iyo daryeelka da'da soo koraysa iyo dadka gabooba.
9. Dawladdu waxay shaqo u rogtaa ujeeddada iyo Istirajiyada Xisbiga ee ah: Dhismo bulsho cusub ee Hantiwadaagga ah nolosheeduna sarreyso dhinaca kasta.
10. Waxay warbixin joogto ah ka siisaa Xisbiga socodka xilkeeda.

Qod. 3aad

Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed wuxuu u wakiishay awoodda sharci sameynta iyo magacaabidda saraakiisha sare, jagooyinka sare oo dhan oo kor ku sheegan, Guddiga Siyaasadda ee XHKS.

Qod. 4aad

Dhaqan galka Sharciga

Sharcigan wuxuu dhaqan galay 16kii bisha Janaayo 1977, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee J.D.S.

Qod. 5aad

Sharci kasta oo aan la socon karin ama ka soo horjeeda sharcigan waa la buriyay.

Qod. 6aad

Qof kasta waxaa la farayaa inuu dhawro hirnageliyo sharcigan, wuxuuna ka mid noqon doonaa Sharciyada Guud ee Dalka.

Muqdisho 25.1.77

*MADAXWEYNAHA J.D.S.*

*JAALLE MAXAMED SIYAAD BARRE*

SHARCI L. 36 ee 6 Abriile 1977, Dhismaha Hashruuca Horumarinta Xeebaha

MADAXWEYNAHA
J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida koowaad, tan 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969.

ISAGOO AQOONSADAY: In ay tahay lagama maarmaan dhismaha Mashruuca Horumarinta Xeebuhu.

ISAGOO ARKAY: Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirrada.

WUXUU SOO SAARAYAA.

SHARCIGA SOO SOCDA

QAYBTA 1AAD

Habka Guud

Qodobka 1aad

Dhismaha Mashruuca

1. Waxa halkan lagu dhisayaa Mashruuc dawladeed oo dhaqaale ahaan keligii taagan hoosna yimaada Wasaaradda Kalluumeysiga hadda kaddibna la oran doono Mashruuca Horumarinta Xeebaha.
2. Mashruucu waxa uu yahay mid mada xbannaan, lehna jiritaan iyo shakhsiyad qaanuuni ah.
3. Mashruucu waxa uu u hoggaansami doonaa sharcigan iyo sharciyada soo socda:

   b) Sharcigan lam; 16 ee soo baxay 1dii Abriil 1970 iyo toosintii ka danbeysey ee Wakaaladaha Madaxa Bannaan.
   t) *Sharciga lam. 36 ee 22 Abriil, 1972 ee shaqaalaha Wakaaladaha madaxa bannaan.*
   j) Sharciga lam. 58 ee 31 Juulaay 1972 ee lacagta Wakaaladaha iyo Hey'adaha madaxa bannaan.

4. Mashruucu waxa uu ka mid yahay kuwa darajada «A».

Qodobka 2aad

*Xarunta iyo Laamaha Mashruuca*

Xarunta Mashruuca waxa ay noqon doontaa magaalo-madaxda, Muqdisho. Haddii loo baahdo Mashruucu waxa uu ka furan karaa laamaha Gobollada iyo Degmooyinka J.D.S.



Qodobka 3aad.

*Ujeeddooyinka iyo Howlaha Mashruuca*

Mashruuca ujeeddooyinka loo dhisay waa kuwa hoos ku taxan:

1. Fulinta Siyaasadda iyo barnaamijka XHKS xagga hirgelinta Iskaashatooyinka Kalluumeysatada iyo Xooleynta danwadaagaha.
2. Qorshaynta Iskudubarridka iyo meelmarinta hawlaha danwadaagaha iyo abuuridda dhaqan badeed oo ku dhisan cilmiga iyo qalab Casri ah.
3. Dejin iyo tababar Kalluumeysato cusub.
4. Dhismaha xarumaha danwadaagaha iyo Iskaashatooyinka, Dugsiyo, Guryo Jiif, Cusbitaallo, dekedo kalluumeysi iyo waxyaalaha kale ee lagama maarmaanka u ah danwadaagaha iyo Iskaashatooyinka.
5. Samaynta Qalabka Kalluumeysiga: doonyo, shabaag iyo wixi la mid ah.
6. Fulinta hawlihiisa Mashruucu waxa uu tilmaansanayaa go'aannada ka soo baxa Golaha Dhexe ee XHKS, sharciga Horumarinta Iskaashatooyinka N. 40, Oktoobar 1973, amarrada iyo tilmaamaha ay siiso Wasaaradda Kalluumeysigu; go'aannada ka soo baxa Shirweynayaasha Ururka Guud ee Iskaashatooyinka Kalluumeysatada, iyo qorshaha sannad kasta loo dejiyo Mashruuca in uu fuliyo.
7. Mashruucu, fulinta hawlihiisa xagga danwadaagaha iyo Iskaashatooyinka, waxa uu la kaashanayaa Wasaaradaha iyo Wakaaladaha ay hawshoodu isku xidhan yihiin, Guddiyada Xisgiba ee Gobollada iyo Degmooyinka iyo Guddiyada Danwadaagaha iyo Iskaashatooyinka.
8. Waxa gacan laga siin doonaa Mashruuca si uu rilkiisa ku guto xagga Farsamada, xagga maaliyadda iyo xagga qalabka.

Qodobka 4aad

*Awoodda*

Mashruucu waxa uu leeyahay, isaga oo aan ku xadgudbin sharcigan, uu ku fuliyo ujeeddooyinka iyo hawlaha ku taxan qodobka 3aad.

Qodobka 5aad

Kormeerka Guud

1. Kormeerka Guud ee Mashruuca horumarinta Xeebaha waxa yeelan doona Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga.

2 Isaga oo tixgelinaya qodobka 1aad ee beddelaadda sharciga lamb. yahay 36 ee 22 Abriil 1972, Wasiirku waxa uu ku leeyahay Mashruuca awood iyo mas'uuliyad buuxda xagga qorshaha horumarinta iyo heshiisyada uu Mashruucu la gelayo hay'ado kale.

## QAYBTA 2AAD

### Qodobka 6aad

### Dhismaha maamulka Mashruuca

1. Mashruucu waxa uu yeelan doonaa Maareeye Guud iyo Maareeye Guud-ku-Xigeen oo lagu magacaabi doono Xeer uu soo saaro Madaxweynaha JDS. isaga oo tixgelinaya ra'yiga Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga iyo talada Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasaarrada.
2. Mashruucu waxa uu ka koobnaan doonaa Waaxyo, qaybo iyo xubno.
3. Waaxyaha waxa madax u noqon doona Agaasimayaal lagu magacaabi doono Xeer uu saxiixo Madaxweynaha JDS. isaga oo tixgelinaya ra'yiga Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga.
4. Maamulayaasha qaybaha iyo xubnaha waxa lagu magacaabi doonaa Xeer uu saxiixo Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga isaga oo tixgelinaya ra'yiga Maareeyaha Guud ee Mashruuca.

### Qodobka 7aad

### *Waajibaadka Maareeyaha Guud*

1. Maareeyaha Guud waxa loo xilsaaray, isaga oo masilaya Mashruuca, fulinta hawlaha iyo ujeeddooyinka ku cad qodobka saddexaad ee sharcigan hawlihiisuna ay yihiin:

b) In uu fuliyo siyaasadda dawladda kacaanka Soomaaliyeed, Sharciyada dalka iyo go'aannada ka soo baxa Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga kacaanka Soomaaliyeed.

t) In uu saxiixo heshiisyada uu Mashruucu dhinac ka yahay isaga oo oggolaansho ka haysto Wasiirka.

j) In uu mas'uul ka yahay maamulka lacagta Mashruuca.

x) In uu meelmariyo wixii qaraar ah ee degdeg ah isaga oo isla markaas ogeysiinaya Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga.

kh) In uu bixiyo wixii amar lagama maarmaan ah si hawsha maamulka guud iyo wixii xisaabuhu ay hab fiican ugu socdaan.



isla markaas ogeysiinaya Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga.

d) In uu fuliyo wixii maamulka caadiga ee Mashruuca ah.

r) In uu fuliyo hawl maamulka shaqada ee aan caadiga ahayn isaga oo ka haysta oggolaansho qoraal ah Wasiirka Wasaaradda Kalluumaysiga.

2. Marka uu maqan yahay Maareeyaha Guud ama ay jiraan asbaabo ka reebaya shaqada, waxa hawshiisii sii wadi doona ku-xigeenka Maareeyaha Guud.

### Qodobka 8aad

### *Xuquuqda qaynuuniga iyo dhaqaalaha Shaqaalaha Mashruuca*

Xuquuqda qaynuuniga iyo tan dhaqaalaha ee Maareeyaha Guud, Agaasimayaasha Waaxyaha iyo shaqaalaha kale ee Mashruuca waxa xukumi doona sharciga lambarkiisu yahay 36 ee 22 Abriil 1972, kuna saabsan shaqaalaha Wakaaladaha iyo hey'adaha madaxa bannaan.

## QAYBTA 3AAD

### Qodobka 9aad

### *Hantida Mashruuca*

Hantida ama dakhliga Mashruucu waxa ay ka iman karaan meelaha hoos ku tilmaaman:

1) Lacag dawladdu ugu deeqdo.

2) Lacag laga reedo % dakhliga danwadaagaha iyo iskaashatooyinka.

3) Deyn waqti dheer iyo waqti gaabanba leh oo uu ka qaato bunuugta.

4) Deyn ama deeq uu ka helo dawlado kale, shirkado ama ururo caalami ah.

5) Lacag ka soo gasha Mashruuca hawlo uu cid u qabtay.

Qodobka 10aad

*Miisaaniyadda Mashruuca*

1. Maareeyaha Guud, marka ay tahay 30ka Oktoobar ama inta ka horreysa sannad kasta, waa in uu iskudubbaridaa Miisaaniyadda caadiga ah iyo tan horumarinta ah ee ku saabsan sannadka soo socda isaga oo faahfaahinaya kuna muujinaya lacagta soo geli doonta ama ka bixi doonta Mashruuca sannadka soo socda, waxaanu hordhigi doonaa si loo oggolaado Wasiirka Wasaaradaha Kalluumeysiga iyo Maaliyadda.

2. Sannadka lacagta ee Mashruuca waxa uu billaabanayaa 1da Jannaayo wuxuuna dhammaanayaa 31 Disember sannad kasta.

Qodobka 11aad

*Xidhitaanka Miisaaniyadda*

1. Maareeyaha Guud marka ay tahay 31 Maarso ama inta ka horreysa sannad kasta waa in uu iskudubbaridaa xidhitaanka miisaaniyadda ee sannadka la soo dhaafay, isaga oo isku-hagaajiyey xisaabtii sannadkaa iyo bandhiggii macaasha iyo khasaaraha Mashruuca, taana uu u gudbiyaa Wasaaradda Maaliyadda iyo tan kalluumeysiga.

2. Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda waxa uu awood u leeyahay in isaga oo la tashanaya Wasiirka Wasaaradda Kalluunka in uu oggolaado xiritaanka Miisaaniyadda, wuxuuna amar ku bixin karaa in lagu qoro faafinta rasmiga ah ee dawladda iyada oo kharajka uu bixinayo Mashruucu.

Qodobka 12aad

Xisaabaadka

Xisaabaadka Mashruuca waxa lagu maamulayaa habka loo dejiyey xisaabaha Wakaaladaha iyo ha'adaha madaxa bannaan.

Qodobka 13aad

*Maamulka Lacagta*

Maamulka lacagta ee Mashruuca waxa xukumaya sharciga lambarkiisu yahay 58 ee soo baxay 31 Juulay 1872 ee Wakaaladaha iyo hay'adaha madaxa bannaan.



Qodobka 14aad

1. Sida uu dhigayo qobobka 17aad ee Xeerka Shaqaalaha dawladda;

Maareeyaha Guud, Agaasimayaasha Waaxyaha iyo shaqaalaha kale ee Mashruuca ma geli karaan ganacsi amase farsamo lid ku ah danaha iyo ujeeddooyinka Mashruuca.

2. Mashruucu waa uu qoran karaa shaqaalaha uu u baahan yahay isaga oo raacaya habka sharciga shaqo qorista ee Wakaaladaha.

Qodobka 15aad

*Xeerka Guud*

Madaxweynaha JDS. waxa uu awood u leeyahay, isaga oo tixgelinaya talada Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga, in uu soo saaro Xeer-nidaamiye Mashruuca xukuma si looga hortago dhibaatada ka iman karta wixii aan ku sheegneyn Sharcigan.

Qodobka 16aad

Tirtirid

Sharci ama xeer kasta oo ka horjeeda amase aan la socon karin sharcigan waa la tirtiray

Qodobka 17aad

Dhaqan Gelid

1. Sharcigani hore ayuu ka dhaqan gelayaa isla markiibana waxa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya.

2. Sharcigaan waa in uu ka mid noqdaa sharciyada rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya.

3. Qof waliba waa in uu dhawraa oo tixgeliyaa kuna qasbaa dadka kale in ay dhawraan sharcigan.

Muqdisho, 6 Abriile 1977

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

## BOGGA LABAAD

## X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. ee 22 Noofember 76, Habkii iyo Qaabkii Waacidiinta Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta L. 36

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashidii koowaad, tii labaad iyo tii saddexaad ee kacaanka Soomaaliyeed.

ISAGOO ARKAY: Warqaddii oggolaanshaha ee lam. JDS/wxm| 14-352|76 ee 6.9.76 ee Madaxtooyada.

ISAGOO TIXGELIYEY: Taladii Wasiirka Garsoorka iyo Arrimaha Diinta in ay tahay lagama maarmaan in loo sameeyo habkii qaabka Waacidiinta Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

WUXUU SOO SAARAYAA

DEKEREETADA HOOS KU QORAN

### Qodobka 1aad

Habkii iyo qaabkii Waacidiinta Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta wuxuu noqonayaa sida hoos ku qoran:

| Habka iyo jagada | Derejo | Tirada | Mush. bishii |
|---|---|---|---|
| Waacidiinta Gobollada | Shaqaalaha aan joogto ahayn | 16 | Sh.So 500 |
| Waacidiinta degmooyinka | shaqaalaha aan joogto ahayn | 81 | Sh. So. 350 |
| Waacidiinta Tuulooyinka, qaarkood | shaqaalaha aan joogto ahayn | 10 | Sh. 350 |
| Waacidiinta Kormeerayaasha Masaajidda iyo Xorumalia Diinta lagu barto | shaqaalaha aan joogto ahayn | 7 | Sh. So.600 |
| Waacidiinta Madaxda Dariiqooyinka | shaqaale aan joogto ahayn | 10 | Sh. So 450 |

### Qodobka 2aad

Degmo walba Masaajiddada ku yaal waxaa loo qorayaa Afar (4) Qof oo loo xilsaaray Arrimaha Masaajidda la xiriira kuwaasoo ah:

| Habka iyo jagada | Derejo | Tirada | Mush. bishii |
|---|---|---|---|
| Shaqaalaha Masaajiddada | shaqaale aan joogto ahayn | 81X4 324 | Sh. So. 200,00 |



### Qodobka 3aad

Xuquuqda shaqada ee shaqaalaha kor ku qoran waxaa lagu dhaqaayaa sharciga u degsan Shaqaalaha Dawladda aan joogtada ahayn.
Mushaharooyinka lagu sheegay qodobka 1aad waxaa laga bixinayaa Madax Xigaha 1.1.2 ee Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta.

### Qodobka 5aad

Mushaharooyinka shaqaalaha ee lagu xusay qodobka 2aad waxaa laga bixinayaa Miisaaniyadda Dawladda Hoose ee Degmo Waliba.

### Qodobka 6aad

Dekereetadani waxay u dhaqan gelaysaa si degdeg ah, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 22 Nof. 1976

Jaalle Dr. Cabdisalaam Sh. Xuseen
WASIIRKA
Garsoorka iyo Arrimaha Diinta

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

WASIIRKA MAALIYADDA

*(Jaalle Cabduraxmaan Nuur Xirsi)*

*Waan aragnay ee diiwaangelinay*
*Diiwaanka lam. 1 bogga lam. 166*
*Muqdisho 17 GEN. 1977.*
*Hantidhawrka Guud*

*G/Sare Cabdullaahi Warsame Nuur*

XEER MADAXWEYNAHA JDS. 22 Feb. 1977 Magacaabid Gudddiga Garsoorka Maxkamadda Madbaadada Dalka ee Gobolka Togdheer. L. 37

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

MARKUU ARKAY: Warqadda 1aad, tan 2aad iyo tan 3aad ee Kaaanka;

MARKUU ARKAY: Sharciga L.1 ee 1da Luulyo 1976;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 3 ee 10ka Jannaayo 1970; kuna saabsan Dhismaha Maxkamadda Badbaadada Dalka;

MARKUU ARKAY: Qodobka 1aad sharciga lam. 29 ee 12kii Maarso 1975, kuna saabsan magacaabidda Guddoomiyayaasha MBD ee Gobollada;

MARKUU ARKAY: inay lagama maarmaan tahay, Si loo socodsiiyo Caddaaladda, in loo magacaabo Guddoomiye u gaar ah Maxkamadda Badbaadada Dalka Gobolka Togdheer, iyo xubnihii dacwooyinka la qaadi lahaa;

MARKUU TIXGELIYEY: Taladii Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka;

WUXUU SOO SAARAYAA

XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Gaashaanle Cali Maxamed waxaa loo magacaabay Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Gobolka Togdheer, isagoo xilkiisii hore sii wadanaya.

Qodobka 2aad

Guddiga Garsoorka Maxkamadda Badbdada Dalka Gobolka Togdheer wuxuu ka koobnaanayaa isla Guddiga Garsoorka ee Maxkamadda Badbaadada Dalka Gobolka Waqooyi Galbeed.

Qodobka 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa mar alla markuu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.DS.

Muqdisho, 22 Feb. 1977

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre*



*XEER MADAXWEYNAHA JDS 9 Abriile 1977 Isku beddel Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Gobollada L. 38*

MADAXWEYNAHA
J. S. S.

MARKUU ARKAY: Warqadda 1aad. Tan 2aad iyo tan 3aad ee kacaanka;

MARKUU ARKAY: Sharciga Lam. 18 iyo 1 ee 1da Luulyo 1976;

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 3 ee 10ka Jannaayo 1970, kuna saabsan Dhismaha Maxkamadda Badbaadada Dalka iyo sharciyadii ka danbeeyey ee lagu toosiyey;

MARKUU ARKAY: Dekereetada Guddoonshaha Golaha Sare Kacaanka ee tirsiyadoodu kala yihiin 178; 179 iyo 180, kuna wada taariikheysan 14ka Juun 1973, Dekereetooyinkaasoo ku saabsan Saraakiil Ciidammada Qalabka Sida oo loo magacaabay inay madax ka noqdaan Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Gobollada Bay, Togdheer iyo Waqooyi Galbeed;

MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka tirsigeedu yahay 721/J1 ee 27.8.1974 oo lagu kala beddelay Garsoorayaashaas:

MARKUU ARKAY: in al lagama maarmaan noqotay beddelaadda Garsoorayaashaas;

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka;

WUXUU GUDDOOMIYEY
XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

1. Gaashaanle Dhexe Ileeye Gige Xoosh, Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka Gobolka Shabeelaha Dhexe, waxaa loo beddelay Gobolka Bay isagoo Guddoomiye ka noqonaaya Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Gobolkaasi.
2. Gaashaanle Dhexe Cumar Cabdulle Cilmi, Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka Gobolka Shabeelaha Hoose, waxaa loo beddelay Gobolka Jubbada Hoose, isagoo ka noqonaaya Guddoomiye Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Gobolkaasi.
3. Gaashaanle Dhexe Cali Muuse Maxamed, Guddoomiyaha Maxkamadda Badbaadada Dalka Gobolka Bay, waxaa loo beddelay Gobolka Shabeelaha Hoose isagoo Guddoomiye ka noqonaana Maxkamadda Badbaadada Dalka ee Gobolkaasi.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa mar alla markuu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 9 Abriile 1977

Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. Soomaaliya
*(Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

## DECRETO DEL MINISTERO DEI LAVORI PUBBLICI

*Concessione e conseguente libera disponibilità delle seguente aree demaniali: Aree di mq. 7505 a favore dei Sigg.ri Scek Mohamed Mohamud e Iusuf Hassan Roble, Aree di mq. 1.365 a favore del Sig. On.le Ali Garad Giama No. 39.*

MINISTERO LAVORI PUBBLICI

DIPARTIMENTO FONDIARIO E DEL DEMANIO

IL MINISTRO

VISTI gli articoli n.77 e n.83, secondo comma della Costituzione;

VISTO il D.L. 7 Febbraio 1965, N. 1. «modificazione alla Legge 3 Giugno 1962. N. 14» relativa all'Ordinamento del Governo;

VISTO il D.A. 13 Settembre 1959, N. 99 di Rep.;

VISTO il D.A. 13 Settembre 1956, N. 115 di Rep.;

VISTO l'ordinanza n. 5 del 12 Aprile 1950;

VISTO la domanda in data 16.9.1957, presentati dai Sigg.ri Scek Mohamed Mahamud e Iusuf Hssan Roble, intesa ad ottenere in concessione a scopo edilizio un appezzamento di terreno demaniale sito in Mogadiscio — a Nord del Viale Lido;

CONSIDERATO che, l'avviso ad opponendum riguardante l'area di terreno richiesta è rimasto a termini di legge all'albo del Municipio di Mogadiscio, ed è stato pubblicato sul Bullettino Ufficiale della Somalia N. 3 in data 1 Maarso 1958, senza opposizione da parte di terzi;

VISTO il progetto concernente la costruzione di un edificio in muraua che è stato approvato e suo tempo dalla Commissione Edilizia Municipale di Mogadiscio nella sua 251$^0$ seduta del 18 Febbraio 1960;

VISTO la Bolletta no. 6759 in data 5 Novembre 1959 dell'Ufficio Tasse sugli Affari attestanti che i Sigg.ri Scek Mohamed Mahaumd e Iusuf Hassan Roble, hanno pagato la somma di Sh. SO. 4.435, — quale prezzo di cessione dell.aree di richiesta in Concessione a scopo edilizio;

CONSIDERATO' che l'aree di terreno richiesta di mq. 8.870, — e stata consegnata ai sigg.ri Scek Mohamed Mahamud e Iusuf Roble, come si rileva dal vernale redatto dal Servizio Tecnico Erariale indata 20 Gennaoi 1960;

VISTO il disciplirare di concessione edilizia e la planimetria che lo integra;



VISTO l'atto n.13804 di Rep. in data 19 Aprile 1960, registrato a Mogadiscio il 21 Aprile 1960 al n. 331 Atti Pub. Vol. X a rogito Notaio Avv. Mario Ciotola, con il quale il Sigg.ri Scek Mohamed Mahamud e Iusuf Hasan Roble cedono e trasferiscono ai Sigg.ri Ahmed Hussen Beihani e Iusuf Hagi Osman Alem, tutti i diritti presenti e futuri sul terreno della superficie di mq.8.870, — sito in Mogadisho — a Nord del Viale Lido;

CONSIDERATO che l'aree del lotto richiesto in concessione edilizia é stata frazionata come da planimetria allegata e che l'appezzamento colorato in rosso di forma quadrata, Confinante: a Nord, e Sud e ad Ovest con strade senza nome previste dal piano regolatore Est pro. Begomi con lati di mt.37,50 e m.223, n. 33,50 e superficie di mq. 1365 é stata venduta al Sig. On. le Ali Garad Giama;

VISTO il progetto di variante n.2600 in data 4.3.1962, approvato nella 281. seduta della Comissione Edilizia del 14.3.1962;

VISTO l'atto di cessione di diritti e ragioni n. 206 di Rep. in data 13.9.61, con il quale i Sigg.ri Ahmed Hussen Beihani e Iusuf Hagi cedono e trasferiscono al Sig. on. Ali Garad Giama tutti i diritti presenti e futuri della porzione di terreno di mq. 1365,

CONSIDERATO che sull'appezzamento ceduto al Sig. On.le Ali Garad Giama é stato, ad opera e spese di questo, ultimo, edificato il fabbricato progettato con la viariante di cui sopra;

VISTO il verbale accertamento tenico con il quale si é appurato che il fabbricato costruito é conforme a quello del progetto n. 2600 in data 4.3.1962 é stata realizzata conformemente al progetto;

VISTO il verbale di accertamento tecnico con il quale si é appurato che

DECRETA

1. E' concesso la concessione edilizia per le porzioni di cui frazionamento: Area di mq. 7505 a favore dei Sigg.ri Scek Mohamed Mahamud e Iusuf Hassan Roble.

2. E' riconosciuta la concessione edilizia e la conseguente libera disponibilità a vafore del Sig. On.le Ali Garad Giama dell'appezzamento di forma quadrilatera con i lati di mq. 33,50 é superficie di mq. 1.365 sita Nord del Viale del Lido.

Mogadiscio, li' 11 Gennaio 1969.

*Visto e registrato Reg. n. 1*

*Gen. 1969 Il Magistrato al*

*foglio n. 2 Mogadiscio, li' 11*

*Con f. to: Mohamed Issa Salwe.*

*Il Ministro*

*f.to Ali Alio' Mohamed*

*BOGGA SADDEEXAAD*

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXI LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D A   D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Ayaan Maxamuud Shiikh Faarax u soo qortay Arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintaa taariikhdu ahayd 19.12.76, uu ku weydiisanayey gobol dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. Qaabkiisuna yahay Rettangolar. Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiioosuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: dhul lamb. 315k.

Koonfur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: Jid.

Bari waxaa ka Xiga: dhul lamb. 310k.

Qofkiioo danaynaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal waaxda dhismaha iyo dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga billaamo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 11 Abriile 1977

Agaaiisimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Caydaruus Cusmaan Keenidooiid*

L. 202



WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D A   D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Axmed Cabdi Axmed. u soo portay Arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 20.2.77. uu ku weydiisanayey gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. Qaabkiisuna yahay Rettangolar. Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman;

Waqooyi waxaa ka xiga: dhul lamb. 339k.

Koonfur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: Jid.

Bari waxaa ka xiga: dhul lamb. 334k.

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 11 Abriile 1977

Agaaiisimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidooiid*

L. 203

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D A   D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Saciid Ismaaciil Cali u soo portay Arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahaya 17.3.1977 uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 20X30 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisunayihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koonfur waxaa ka xiga: dhul lam. 340.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul lamb. 335.

Bari waxaa ka xiga: dhul lamb. 342.

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 11 Abriile 1977

Agaaiisimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidooiid*

L. 204



## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

### N A A D A   D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Qeyre Cilmi iyo Cabdullaahi Axmed Xirsi. u soo qortay Arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 15.2.77. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Wardhiigley qaabkiisuna yahay Rettangolar. Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo.

Koonfur waxaa ka xiga: Wiilashii Dhuxul Karbone.

Galbeed waxaa ka xiga: Cali Axmed Yare.

Bari waxaa ka xiga: Xasan Nuur.

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 11 Abriile 1977

Agaaiisimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidooiid*

L. 205

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D A D H U L

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Cabdullaahi Warsame Jaamac. u soo qortay Arji waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii taariikhdu ahayd 9.1.77. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Yaaqshiid qaabkiisuna yahay Rettangolar. Addimihiisuna yihiin 20X10 kuna fadhiya 200 mhd. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Cumar Beloo.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: Axmed.

Bari waxaa ka gixa: 'Axmed Falanse.

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa mudo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 11 Abriile 1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidooiid*

L. 206



WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

N A A D A D H U L

Waxaa la Caddaynayaa in Jaalle Sareedo Cali Faarax. u soo qortay Arji Waadxatan dhismaha iyo dhulka maalintii taarijkhdu ahayd 9.7.77. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman:

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koonfur waxaa ka xiga: dhul lam. 309k.

Galbeed waxaa ka xiga: Jid.

Bari waxaa ka xiga: dhul lam. 316k.

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa mudoo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 11 Abriile 1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidooiid*

L. 207

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

NAADA DHUL

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Maxamed Ciise Cabdi u soo qortay Arji Waaxdatan dhismaha iyo dhulka maalintii aariikhdu ahayd 10.3.1976. uu ku wydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar degmada Hodan. Qaabkiisuna yahay Rettangolar. Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman;

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koonfur waxaa ka xiga: dhul lam. 176k.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul lam. 202k.

Bari waxaa ka xiga: dhul lam. 204k.

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 11 Abriile 1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidooiid*

L. 208



WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

NAADA DHUL

Waxaa la caddaynayaa in Jaalle Maxamed Ismaaciil Warsame u soo qorta Arji waaxdatan dhismaha iyo dhulka Maalintii taariikhdu ahayd 2.3.76. uu ku weydiisanayey gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal magaaladatan Xamar degmada Hodan. Qaabkiisuna yahay Rettangolar Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna yihiin sida hoos ku tilmaaman;

Waqooyi waxaa ka xiga: Jid.

Koonfur waxaa ka xiga: Jid.

Balbeed waxaa ka xiga: dhul lam, 290k.

Bari waxaa ka xiga: dhul lam 292k.

Qofkii daneynaaya dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud waxaana laga doodi karaa muddo 30 (soddon) maalmood ah oo laga bilaabo maalinta lagu soo qoro buugga faafinta rasmiga ah.

Muqdisho, 11 Abriile 1977

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidooiid*

L. 209

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## DEDDELAAD NAADA DHUL

Waxaa la caddaynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Xaawa Muuse Cali maalintii 28.10.60 loon aoggolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Wardhiigley. Qaabkiisuna ahaa Rettangolar. Addimihiisuna ahaayeen 40*30,80*43,40 kuna fadhiya 1236,20 mdh.; looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Cabdulcasiis Jidka Sanca. sidaas aawadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa: 1123/596 taariikhda 13.-5.1968. oo ka baxday xafiiskaan waxa isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud , wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Cabdulcasiis Jidka Sanca qaabkiisuna waa Trabesio addimihiisuna yihiin 48*36X32:2 kuna fadhiya 1344 mdh. Soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran:

Waqooyi waxaa ka xiga: dhul dawladeed.

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul dawladeed.

Bari waxaa ka xiga: Wadddda Sanca.

Muqdisho, 11 Abriile 1977.

Agaasimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Caydur uus Cusmaan Keenidooiid*

L. 210



## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

## DEDDELAAD NAADA DHUL

Waxaa la caddaynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaall Khadiija Afrax Abuukar. maalintii 27.6.68. loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan. qaabkiisuna ahaa Rettangolar. addimihiisuna ahaayeen 60X50 kuna fadhiya 3000 mdh. looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Hodan Jidka Muq-Afgooye; sidaas aawadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 1123 1899 Taar. 7.10.68 oo ka baxday Xafiiskan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Hodan. Jidka loo maro Fao. qaabkiisuna waa Rettangolar. addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran:

Waqooyi waxaa ka xiga: dhul lam. 329k.

Koonfur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul lamb. 322k.

Bari waxaa ka xiga: dhul lam. 324k.

Muqdisho, 11 Abriile 1977

Agaaiisimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidooiid*

L. 211

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

DEDDELAAD NAADA DHUL

Waxaa la caddaynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Cawrala Cegaal Diriir maalintii 17.5.67. loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan. qaabkiisuna ahaa Rettangolar. addimihiisuna ahaayeen 60X50 kuna fadhiya mdh. looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Hodan. Jidka Muq-Afgooye. sidaas aawadeed naadadii hore loogu diray warqadda lambarkeedu ahaa WHG/3.23.1654. oo ka baxday xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Dhulka loogu bdedelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Hodan. Jidka loo maro Fao. qaabkiisuna waa Rettangolar. addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 mdh. Soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran:

Waqooyi waxaa ka xiga: dhul lam. 332k.

Koonfur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul lamb. 325k.

Bari waxaa ka xiga: Jid.

Mupdisho, 11 Abriile 1977

Muqdisho, 11 Abriile 1977

Agaaiisimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidooiid*

L. 212



WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA

DEDDELAAD NAADA DHUL

Waxaa la caddaynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Adar Cali Maxamed maalintii3.8.68 loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan. qaabkiisuna ahaa Quadrato. addimihiisuna ahaayeen 50X50 kuna fadhiya 2500 mdh. looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Gentro Latte Jidka sidaas aawadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 1664.2274.68 oo ka baxday xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho degmada Hodan. Jidka qaabkiisuna waa Quadrato. addimihiisuna yihiin 50X50 kuna fadhiya 2500. mdh. Soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran:

Waqooyi waxaa ka xiga: dhul lam. 316k.

Koonfur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul lam. 309.

Bari waxaa ka xiga: dhul lam.311.

Muqdisho, 11 Abriile 1977

Agaaiisimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka
*Inj. Cayduruus Cusmaan Keenidooiid*

L. 213

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD
## WAAXDA DHISMAHA IYO DHULKA
## DEDDELAAD NAADA DHUL

Waxaa la caddaynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Khaliif Xirsi Cali maalintii 17.6.68 loona oggolaaday oo ku yiil Muqdisho degmada Hodan, qaabkiisuna ahaa Rettangolar. addimihiisuna ahaayeen 30X50 kuna fadhiya 3000 mdh., looga qaaday danta guud, looguna beddelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho degmada Hodan Jidka loo maro FAO, sidaas aawadeed naadadii hore loogu soo diray warqadda lambarkeedu ahaa 972.178.26.9.68. oo ka baxday xafiiskaan waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:

Dhulka loogu beddelay dhulkii looga qaaday danta guud, wuxuu ku yaal Muqdisho, degmada Hodan. Jidka Loo maro Fao. qaabkiisuna waa 600 mdh. Soohdimihiisuna waa sida hoos ku qoran:

Waqooyi waxaa ka xiga: dhul lam. 319k.

Koonfur waxaa ka xiga: Jid.

Galbeed waxaa ka xiga: dhul lamb. 312k.

Bari waxaa ka xiga: dhul lam. 314k.

Muqdisho, 11 Apriile, 1977

Agaaiisimaha Waaxda Dhismaha iyo Dhulka

*Inj. Caydaruus Cusmaan Keenidooiid*

L. 214



## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9.965 N.S. Lumidda buugga keydka l. 6658 di Sh. S0 919,30, bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta 2aad

### WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo buugga keydka kaddib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood dekereetada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

### WAXAA LA CODSANAYAA

In buugga keydka cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Xaliima Cabdi Caruush ama qof isla iyada ka wadata wakaalad rasmi ah, ayadoo la sugaayo 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 23.1.77

Goddoomiyaha Max. Gobol. Banaadir

*(Dr. Cabdirisaaq Geelle Yuusuf)*

L. 215

SOCIETA' COMMERCIALE ITALO SOMALA — S.C.I.S. — S.P.A.

SALDHIGGA: MUQDISHO (J. D. SOOMAALIYA

RA'ASULMAAL SH. SO. 5.000.000,00

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH.

Sahmi qabayaasha Sharikadda Societa' Commerciale Italo Somala — S.C.I.S., waxaa la isu yeeray shirka caadiga ahoo la qaban doono maalinta 16ka juunyo 1977 saacaddu markay tahay 9, fadhiga ugu horreeya, haddii taas suura galiwaayo, waxaa mar labaad la isu imaan doonaa maalinta 24ka juunyo 1977, isla saacadda kor ku qoran, oo lagu qaban doono Lugano, Corso Elvezia 10, sii go'aan looga gaaro arrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA DOODDA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista Maamulka;

2) Miisaaniyadda iyo dheef-Deynta la xiray 31.12.76 iyo go'aannada la xiriira;

3) Dhisidda Lambarka Guddiga Maamulka guud, magacaadib Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista Maamulka.

waxaa xaq u leh in ay shirka ka soo qayb galaan, sahmi qabayaasha ku qoran buugga xubnaha Sharikadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono, oona ilaa waqtigaas dhigaan sahmiyaa shooda Saldhigga Sharikadda ee Muqdisho, amase Xafiiska Sharikadda ku yaal Itaaliya, Piazza degli A Affari 3, Milaano amase;

— Banco di Roma la Svizzera Italiana Lugano (Svizzera).
— E.I.F.A. Via Pioda 14, Lugano (Svizzera)
— Credito Italiano Sede di Milano.

GUDDIGA MAAMULKA

L. 216



SOCIETA, COMMERCIALE ITALO — S.C.I.S. — S.P.A. Sede Legale: Mogadiscio. (Repubblica Democr. Somala) Capitale sociale int. versato Sh. SO. 5.000.000.

AVVISO DI COVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Gli Azionisti della Societa' Commerciale Italo — Somala, S.P.A. sono convocati in Assemblea Ordinaria per il giorno 16 Giugno 1977 alle ore 9 in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione per il giorno 24 giugno, stessa ora, a Lugano, Corso Elvetia 10, per deliberare sul seguente.

ORDINE DEL GIORNO

1) Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale;

2) Bilancio e Conto Perdite e Profitti dell'esercizio chiuso al al 31.12.1976 e deliberazioni relative;

3) Determinazione del numero dei Consiglieri e nomina dei componenti il Consiglio di Amministrazione e del Collegio Sindacale;

Avranno diritto di partecipare alla Assemblea gli Azionisti inscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per la Assemblea e che entro tale termine abbiano effettuato il deposito delle azioni presso la Sede Sociale in Mogadiscio, o presso gli Uffici di Recapito della SAIS Milano Piazza degli Affari 3, oppure presso le seguenti casse:

— Banca di Roma per la Svizzera — Lugano, (Svizzera),
— Eifa, Via pioda n. 14, Lugano (Svizzera);
— Credito Italiano, Sede di Milano.

*Il Consiglio*
*di Amministrazione*

L. 216

SOCIETA. Agricola Italo Somala — S.A.I.S. — S.P.A. Saldhigga: Muqdisho (J. D. Somalia,) Ra'asumaal Sh. S0. 1.200.000.00

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Sahmi qabayaasha Sharikadaha Societa' Agrcola Ltato Somala— S.A.I.S., waxaa la isu yeeray shirka caadiga ah oo la qaban doono maalinta 16ka Juunyo 1977 saacaddu markii ay tahay 10,30 fadhiga ugu horreeye, haddii taas suura galiwaayo, waxaa mar labaad la isu imaan doonaa maalinta 24ka Juunyo 1977, isla saacadda kor ku qoran, oo lagu qaban doono Lugano, Corso Elivezia sii go'aan looga gaaro arrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA DOODDA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista maamulka;

2) Miisaaniyadda iyo Dheef-Deynta la xiray 31.12.76 iyo go'aannada la xiriira;

3) Dhisidda lambarka Guddiga Maamulka iyo magacaabid Maamule jadiid.

Waxaa xaq u leh in ay shirkad ka soo qayb galaan, sahmi, qabayaasha ku qoran buugga xubnaha Sharikadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono, oona ilaa waqtigaas dhigaan sahmiyaashooda Saldhigga Shirkadda ee Muqdisho, amase Xafiiska Sharikadda ku yaal Itaaliya, Piaza degli Affari, 3, Milano amase:

— Banco di Roma ped la Vvizzera Italiana, Lugano (Svizzera)

— E.I.F.A. Via Poida 14, Lugano (Svizzera)

— Gredito Italiano, Sede d iMilano.

GUDDIGA MAAMULKA

L. 217



SOCIETA' AGRICOLA ITALO SOMALA — S.A.I.S. — S.P.A. Sede Sociale: Mogadiscio (Repubblica Dem. Somala) Capitale versato Sh.SO. 1,200.000,00

AVVISCO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Cali Azionisti della Societa' Agricoli Italo Somala S.P.A. sono convocati in Assembdea Ordinaria per il giorno 16 guigno 1977 alle ore 10,30 in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione per il giugno, stessa ora, a Lugano, Corso Elvezia 10, per deliberare su seguente

ORDINE DEL GIORNO

1) Relazione del Consiglio di Amministrazino e Rapporto del Collegio Sindacale;

2) Bilancio e Conto Perdite e Profitti dell'esercizio chiuso al 31.12.1976 e deliberazioni relative;

3) Nomina di un Amminitratore per integrazione del Consiglio di Amministrazione.

Avranno diritto di partecipare alla Assemblea gli Azionisti inscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per la Assemblea e che entro tale termine abbiano effettuato il deposito delle azioni presso la Sede Sociale in Mogadiscio o presso gli Uffici di Recapito della S.A.I.S. in Milano Piazza degli Affari, oppure Presso le seguenti casse:

— E.I.F.A., Via Pioda 14, Lugano (Svizzera);

— Credito Italiano, Sede di Milano.

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

L. 217

SOCIETA' ROMANA IN SOMALA — S.P.A. Saldhigga: Kisimaayo (Jamhuuriyadda D. Soomaaliya) Raasumaal Sh. SO. 1.500.000, 00

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

sahmi qabayaasha Sharikadda Societa' Romana in Somalia — S.P.A., waxaa la isu yeeray shirka caadiga ah oo la qaban doono maalinta 16 Juunyo 77, saacaddu markay tahay 12. fadhiga ugu horeeya, haddii taas suura galiwaayo, waxaa mar labaad la isu imaan doonaa maalinta 24ka Juunyo 1977 isla saacadda kor ku qoran, oo lagu qoban doono Lugano, Corso Elvezia 10, sii go'aan looga gaaro arrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA DOODDA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista Maamulka;

2) Mijsaaniyadda iyo Dheef-Deynta la xiray 31.12.76 iyo go'aannada la xarjira iyo waxa ku saabsan qodobka 2446 ee sharciga Madaniga ah.

3) Dhisidda lambarka Guddiga iyo magacaabid maamule jadiid.

Waxaa xaq u leh in ay shirka kasoo qayb galaan, sahmi qabayaasha ku qoran buugga xubnaha Sharikadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono. oona ilaa waqtigaas dhigaan sahmiyaashooda Saldhigga ee Kisimaayo, amase Xafiiska Sharikadda ku yaal Itaaliya, Piazza degli Affari, 3, Milano amase:

— Banco di Roma per la Svizzera Italiana Lugano (Svizzera);

— E.I.F.A. Via Poida 14, Lugano (Svizzera);

— Credito Italiano, Sede Milano.

GUDDIGA MAAMHULKA

L. 218



SOCIETA' ROMANA IN SOMALIA — S.P.A. Sede: Chisimaio (Repubblica Democratica Somala) Cap.Soc. Sh. SO. 1.500.000.00 (inta; Vers)

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Cli Azionisti della Societa' Romana in Somalia S.P.A. sono convocati in Assemblea ordinaria per il giorno 16 giugno 1977, alle 12 in prima convocazione ed, in seconda convocazione per il giorno 24 giugno, stessa ora, Lugano Corso Elvezia, 10, per diliberare sul seguente.

ORDINE DEL GIORNO

1) Relazione del Consiglio di Amministrazione e Repporto del Collegio Sindacale;

2) Billancio e Conto Perdite e Profitti dell'esercizio chiuso al 31.12.1976 e deliberazioni relative anche in merito a quanto previsto dall.art. 2446 C.C.

3) Nomina di un Amministratore per integrazione del Consiglio di Amministrazione.

Avranno diritto di partecipare alla Assemblea gli Azionisti inscritti nel Libro dei Soci almeno cinpue giorni prima di quello fissato per l'Assemblea e che entro tale termine abbiano effettuato il deposito delle azioni presso la Sede Sociale in Chisimaio o presso gli Uffici di Recapito della SAIS in Milano Piazza degli Affari, 3, oppure presso le seguenti casse:

— Banco di Roma per la Svizzera Italiana: Lugano (Svizzera)

— E.I.F.A. Via Pioda 14, Lugano, (Svizzera)

— Credito Italiano, Sede di Milano.

IL CONSIGLIO DI AMMINITRAZIONE

L. 218

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga;

HADDUU ARKAY: qod. 69 D.L. 9.9.65 N' 2; lumidda buugga kaydka lam. 975 oy ku qoran tahay Sh. S0. 7.000.00

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Buugga keydka kaddib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekeretada lagu shaaciyo Faafinta rasmiga ah dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buugga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Axmed Maxamuud Wardheere ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci h, ayadoo la sugaayo muddada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheeg-nay.

Muqdisho, 4.5.77

Guddoomiyaha Maxka. Gobol. Banaadir

Cabdullaahi Daahir Barre

*L. 219*



MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga;

HADDUU ARKAY: qod. 69 D.L. 9/9/65 N. 2; lumidda Buugga keydka lam. 945/4 oy ku qoran tahay lagac dhan Sh. S0. 1.000

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Buugga keydka èaddib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekereetada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Bugga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Suufi Jeylaani Maxamed ama qof isla asaga ka sita wakaal sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay

Muqdisho, 11.4.77

Goddoomiyaha Max. Gobolka Banaadir
*Cabdullaahi Daahir Barre*

*L. 219/Bis*